Dhaqtar Devon Q. Horton, *Kormeeraha guud*

Mudane Diijon DaCosta, Sr., *Guddoomiyaha Guddiga*
Marwo Deirdre P. Pierce, *Guddoomiye Ku xigeen*
Marwo Anna Hill
Marwo Whitney McGinniss
Marwo Allyson Gevertz
Marwo Vickie B. Turner
Dhaqtar Joyce Morley

**WIXII FASAXID DEGDEG AH**

Janaayo 9, 2024

**Xiriirka:**
Donald Porter, *Ed.D.* 678-481-4110
Carla Parker 404-734-1717

# 16 Dugsiyada DCSD ayaa ka Baxay Liisaska Hormarinta *CSI, Promise*, iyo *TSI*; 96% ka mid ah Dugsiyada Horizon ayaa Muujiyay Faa'idooyin Waxbarasho ee Barashada Tusmada

(STONE MOUNTAIN, GA) – Ee 2022, labaatan-iyo shan (25) Dugsiyada Gobolka DeKalb ayaa loo aqoonsaday sida Taageero iyo Hormarin Dhameystiran (*CSI*) 5% Ugu hooseeyo, CSI Promise, ama Taageerada iyo Hormarinta La bartilmaamsaday (*TSI*). Maanta, lix iyo toban (16) dugsiyo ayaa laga siidaayay liisaska dugsiyada faderaal ahaan loo aqoonsaday sida ku saleysan natiijooyinka Tusmada Waxqabadka Kulliyada iyo U diyaarsanaanta Shaqada 2023 (*CCRPI*).

"Boqolkiiba lix iyo sagaashan Dugsiyadeena Horizon waxay kordhiyeen guud ahaan buundooyinka Barashada Tusmada ee 2023," waxaa yiri Kormeeraha guud Dhaqtar Devon Q. Horton. "Waxaan ku amaanayaa maamulayaasheena iyo bulshooyinka dugsiga oo ka go'naantooda iyo u heelankooda lagu kordhinayo aqoonta ardayga. Waan sii wadeynaa inaan siino taageero dheeri ah oo ka sareyso iyo dhaafsan dugsiyada ka baxaya liisaska federaal ahaan loo aqoonsaday si loo hubiyo in faa'idooyinka waxqabadyadooda sii socdaan oo ay ka sii baxsanaadaan liisaska hormarinta."

Sadexda (3) dugsiyo ee xigga ayaa laga saaray liisaska Taageerada iyo Hormarinta Dhameystiran (*CSI*) 5% Ugu hooseeyo:

- Dugsiga hoose Fairington
- Dugsiga hoose Panola Way
- Machadka Waxbarashada Ronald McNair Discovery

Afarta (4) dugsiyo ee xigga ayaa laga saaray liisaska Taageerada iyo Hormarinta La bartilmaameedsaday (*TSI*):

- Dugsiga Hoose Pine Ridge
- Dugsiga Dhexe Salem
- Dugsiga Dhexe Shadow Rock
- Dugsiga Hoose Woodridge

Intaas waxaa dheer, sagaal (9) dugsi ayaa laga saaray kuwaas oo horaan loogu aqoonsaday sida *Promise*:

- Dugsiga Hoose Dresden
- Dugsiga Hoose Flat Rock
- Dugsiga dhexe Mary McLeod Bethune
- Dugsiga Dhexe McNair
- Dugsiga Hoose ee Montclair
- Dugsiga Hoose Oak View
- Dugsiga Hoose Peachcrest
- Dugsiga Hoose Stone Mill
- Dugsiga Towers

Shuruuda liisaska dugsiga faderaal ahaan loo aqoonsaday ee 2023-2024 CSI, ATSI, iyo TSI ayaa la cusbooneysiiyay si loogu daro dhammaan buundooyinka Qeybta CCRPI 2023 ee la heli karo. Buundooyinkaan waxaa ka mid ah Barashada Tusmada, Hormarka, Daboolida Meelaha banaan, iyo U diyaargarowga heerarka dugsiga hoose iyo dhexe. Heerka dugsiga sare, Qeybta CCRPI waxaa ka mid ah Barashada Tusmada, Hormarka, Daboolida Meelaha banaan, U diyaargarowga, iyo Heerka Qalinjabinta. Heerka Qalinjabinta CSI dugsiyada waxay leeyihiin Heerka Qalinjabinta oo afar-sanno ah oo wax ka yar ama u dhigma 67%.

-BADAN-

Waaxda Waxbarashada Georgia waxay haysaa warbixin sharaxan ee ku saabsan isbadelada CCRPI 2023 iyo qaabka habeysan ee loo isticmaalo in lagu aqoonsado dugsiyada federaal ahaan loo aqoonsaday **HALKAAN**.

Tirada guud ee dugsiyada faderaal ahaan loo aqoonsaday ayaa lagu yareeyay shan iyo labaatan (25) oo 2022 lagana dhigay lix iyo toban (16) oo 2023. Lix iyo tobanka (16) dugsiyo ee haray ama ku cusub liisaska ayaa ah sida xigta:

**Bandhiga Ugu hooseeyo CSI iyo Heerka Qalinjabinta CSI:**

Dugsiga Kale DeKalb

Dugsiga Sare Elizabeth Andrews

**Heerka CSI Taageerada IV:**

Dugsiga Hoose Flat Shoals

Dugsiga Hoose Stone Mountain

**Heerka Qalinjabinta CSI:**

Dugsiga Sare Clarkston- cusub

Xarunta Waxbarashada Gaarka ah ee East DeKalb- cusub

Dugsiga Sare Cross Keys

Dugsiga Sare McNair

Waxaa dheeri ku ah, Gobolka DeKalb wuxuu leeyahay sideed (8) dugsiyo ee soo galay liisaska Taageerada Dheeraadka ah iyo Hormarinta La bartilmaameedsaday (*ATSI*) oo Ardayda Naafada ah (*SWD*) oo markii koowaad ah:

Dugsiga Hoose Browns Mill

Dugsiga Hoose Hightower

Dugsiga Sare Lithonia

Dugsiga Sare Martin Luther King, Jr.

Dugsiga Hoose Murphey Candler

Dugsiga Hoose Rock Chapel

Dugsiga Hoose Snapfinger

Dugsiga Hoose Stoneview

“Taageerada dheeraadka ah ee lagu daray sannad dugsiyeedkaan wuxuu ka sii soconayaa dugsiyadeena, kuwaasoo ku haray liisaska CSI oo laba sano oo dheeraad ah. Dugsiyada CSI iyo ATSI ee dhawaan la aqoonsaday waxay uga sii gudbayaan qaab dhismeedkeena taageerada dhammeystiran ee Horizon si loo hubiyo in dugsiyadaan ay helaan wax walba oo ay u baahanyihiin si ay u sii wadaan inay ku sii socdaan hormarka guusha ardayda ee sannad dugsiyeedkaan,” Dhaqtara Horton ayaa yiri.

“Waqti ka dib, yoolkeena ayaa ah inaanan ku yeelan dugsiyo la aqoonsaday liisaska hormarinta faderaalka.”

XXX

Robert R. Freeman Administrative Complex
1701 Mountain Industrial Blvd. | Stone Mountain, GA 30083
678.676.1200 | www.dekalbschoolsga.org